

Ballanqaadkayaga Sii-jiritaanka

Deegaankeena oo la daryeelo waxay muhiim u tahay in la fiicneeyo caafimaadka bukaankayaga, shaqaalahayaga iyo beesheena. Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital waxa u haddaba qaaday tallaabooyin lagu yareynayo isticmaalka korontada oo hoos loogu dhigayo naqaska kululeeya dunida (greenhouse gas emissions). Waxyaabo kale ayaa la soo wadaa marka annu bilawno mashaariic dhisme oo waaweyn.

Maxaa Cusub:

Wax Beddel u Ah Baabuur Ad Kaligaa ku Shaqo Tagtid – FLEXcommute

Bishii Kow iyo Tobnaad 2019, Allina Health waxay bilawday barnaamij socdaal oo la yidhaahdo FLEXcommute, oo u ka shaqeysiyo [Luum](#), si loo hirgaliyo wax beddel u ah inad kaligaa baabuur ku tagtid shaqada.

- Qaybaha barnaamijka dhiirigalinta shaqaalaha waxa ka mid ah:
 - Ikhtiyaaro ah shaqee adiga oo meel fog jooga taasoo ku saabsan jagooyin shaqo oo badan
 - Fududeyn dheeraad ah oo la siiyo kuwa raaca baasgeel/bushkuleeti
 - Taageero la siiyo gaadiidka leh noocyoo kala duwan
 - Maalgalin dhaqaale oo la siiyo gaadiidka dadweynaha
 - Barnaamij ku jira telefonada casriga ah oo loogu talogalay shaqaalaha si ay u doortaan wax beddel u ah baabuur u raaco hal qof



Warshadda Adeegga ee Dhexe


Warshadda Adeegga ee Dhexe waxay kululeyn, qaboojin, tamar iyo biyo siin doontaa cisbitaalkayaga. Wuxuu annu habkayaga hadda jira ee aan *shaqadeyntiisu hufnayn* ku beddeli doonaa hab cusub, oo ka sii nadiifsan, oo leh *hufnaan shaqeyn oo sareysa*. Inta lagu jiro dhisidda, waxa annu isticmaali doonaa qalabka xakameynta wasakheynta hawada si loo badbaadiyo tayada hawada xaafadda.



Sidee baanu Warshada Adeegga ee Dhexe (CUP) uga dhigaynaa mid u shaqeynaya si sii hufnaan badan?

- Iyada oo karkariyeyaasha biyaha ee sannadii 1950-yadii lagu beddelo 2 karkariye oo leh hufnaan tamar
- Iyada oo mishiinada dhalinta koronta ee degdegga ee gaboobay lagu beddelo koronto dhaliyeyaa leh hufnaan tamar

- Koronto dhaliyeyaasha leh hufnaan = waa kuwo isticmaalaya shidaal ah naafsto oo intii hore ka yar marka ay timaado xaalad weyn oo degdeg ah



Adeegyada dheeraadka ah ee CUP:

- Warashada Adeegga Dhexe waxay uumi u soo saari doontaa Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital, Cisbitaalka carruurta ee Children's Minnesota, iyo deris kale. Wuxuu annu uumiga u isticmaalnaa in la jeermi-dilo qalabka caafimaadka oo la diiryo dhismeyaashayada. Adeeggan oo la wadaago waxay abuurtaa degmo hufan xagga qaybinta tamarta.
- Warshaddu waxay lahaan doontaa habab qabta biyaha roobka si loo yareeyo culayska saaran habka biyaha daadka ee degmada.

Goobta Gaadiidka

Goobta Gaadiidka ee cusub waxa joogi doonaa noocyoo kale duwan oo ah gaadiid, waxana ay lahaan doontaa beer cadceedeed iyo dheeraad.



Qaybaha Sii-jiritaanka

Cayayaanka Bacriminta ee Dhir Ubaxeedka

Iyadoo gacan laga helayo ururka maaryanta biyaha ee Mississippi (MWMO) Deeq waxqabad oo ah \$50,000, Allina Health ayaa beertay bacriminta cayayaanka-beero saaxiibtinimo May dhexdeeda 2022 oo ay weheliso dhinaca gaadiidka Hub, 5,000- cag laba jibaaran oo u dhow Bartamaha Magaalada Greenway. Deegaanka cusub ee bacriminta cayayaanka waxaa kujira dhir si taxadar leh loo doortay iyadoo lagu saleynayo wakhtiga ubaxooda iyo awooda ay si fiican u koraan oo ay uga hortagaan nabaad guurka jiirarka dhaadheer. Martigelinta firfircooni ee Cayayaanka Bacriminta ee Dhir Ubaxeedka -coneflower, muskingum dogwood, rough blazing star, oo qaar lagu magacaabo- hadda waxay soo dhaweynayaan bukaannada isbitaalka iyo dadka deegaanka.

Waxay yareeyaan biyaha dabaylaha sidoo kalena waxay hoos udhigaan nabaad guurka

- Waxay yareeyaan biyaha dabaylaha sidoo kalena waxay hoos udhigaan nabaad guurka
- Taageer nolosha pollinarots (cayayaanka bacriminta)
- Ku darso firfircooniда xaafadda Philips ee Bartamaha Magaalada

Wax badan ka baro kuwan [pollinator \(bacriminta cayayaanka\) -beero saaxiibtinimo](#).

Beer Cadceedadka Beesha (Solar Garden)



- [Cooperative Energy Futures](#) ayaa saqaf cadceedad ka dhisi doontaa Goobta Gaadiidka. Beer cadceedadka beeshu waxay deganyaasha u oggolaanaysaa inay is qoraan tamarta cadceeeda oo u-hayn (credit) loo galiyo xisaabtooda tamarta ee Xcel Energy. Beer cadceedadka Goobta Gaadiidku waxay soo saari doontaa qiyaastii 1 megawaat oo ah koronto. Taasi waa tamar ku filan inay koronto siiso 250 guri.

Wadada Lugta ee Beesha



- Dhinaca Midtown Greenway, wado lugeed ayaa isku xidhi doonta jidka Chicago Avenue iyo Elliot Avenue. Goobtan aan hadda la isticmaalin waxa ka abuurmi doonaa heer jid oo sii dhaqdhaqaaq badan. Waxa lagu beeri doonaa dhir wadani ah oo soo jiita bacrimiyeyaa isla markaana waxay maareyn doontaa biyaha daadka.



Sawir fikradeedka wado lugeed cusub oo la barbar ah Goobta Gaadiidka ee saaran jidka Chicago Avenue, ee ku xiga Greenway

Meelo Lagu Dabeeeyo Baabuurta ku Shaqeeya Korontada



- Baabuurta ku shaqeeya korontadu waxay awoodi doonaan inay koronto ka qaataan Goobta Gaadiidka.
- Mashruucani wuxu mustaqbalka taageeri doonaa baabuur ku shaqeeya koronta oo sii badan.

Taageero la Siiyo Gaadiid Leh Noocyoo Kala Duwan (Multimodal Transportation)



Gaadiidka leh noocyoo badan waxa ku jira siyaabo kala duwan oo socdaaleyaashu ku tagi karaan meesha ay damacsan yihiin kagana soo noqon karaan. Waxa annu qabanaynaa qaybtayada si shaqaalahayaga looga gargaaro inay shaqeeyaan iyada oo isla markaana la yareynayo naqaska ay sii daayaan baabuurtu.

Sidee baa Goobta Gaadiidku u Dhammeystiraysaa Gaadiidka Leh Noocyoo Kala Duwan?

- Meesha goobta ku taalo oo ah safka jidka Chicago Ave Bus Rapid Transit Line (Khadka Safarka Dhakhsaha ah ee Baska) ayaa horumarinaysa gaadiidka dadweynaha.
- Adeegga Baasgeel/Bushkuleeti ku Tag Shaqada (Bike-to-Work) waxa ku jira irridda shaqaalaha ee ku aadan Greenway, meelo lagu qufusho baasgeelka, dhigisho baasgeel, iyo qubeys.
- Waxa u isku xidhaa socdaaleyaasha isticmaala wadaagista baasgeelka iyo beddelaadyo kale, oo u ku jiro barnaamijkayaga FLEXcommute.

Socodka iyo Raacista Baasgeelka

- U doodista Greenway



- Jidka baasgeelka/bushkuleetiga ee Greenway waxa u qayb la arki karo ka yahay Badhtamaha magaalada (Midtown) waxana u dhex maraa cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital goobta rugta maamulka ee Allina Health. Kooxda la Shaqeynta Beesha ee Allina Health (Allina Health Community Engagement) waxay la shaqeysaa Isbahaysiga Midtown Greenway Coalition, ururada xaafadda, iyo Magaalada, Degmada, iyo saraakiisha Gobolka si loogu doodo jidka iyo deganeyaasha ku nool dhererkeeda.

Gudbin

- Goobtayada:
 - Goobta Gaadiidka ee cusub waxay taageeri doontaa gudbin safar oo noocyoo kala duwan oo loogu talogalay shaqaalaha cisbitaalka si loo kaabo khadadka [Bus Rapid Transit](#) (Gudbinta Dhakhso ah ee Baska).
- Khadadka Bus Rapid Transit D iyo B:
 - Khadka **B Line** ee jidka Lake Street / Marshall Avenue wuu sii horumarayaay iada oo la adeegsanayo qorsheynta mashruuca.
 - Khadka **D Line** ee jidka Chicago iyo Emerson-Fremont Avenues waxa dhisiddiisu bilaabmi doontaa 2021.

Dheeraad ka baro dedaalada sii-jiritaanka deegaanka ee cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital iyo Allina Health.